*Ma ogtahay inaad dib u cusboonaysiin karto gurigaaga SATO VuokraKoti (GuriKiro)?*

# DAYACTIRRADA ADIGA SAMAYSIGA AH



*Waxaan rajeyneynaa in, aad ku nasteexeysato hoygaaga una sharaxato sidaad jeceshahay. Agabka iyo sharaxaad ka sokow, waxaa iyana muhiim ah muuqaalka/bilicda gidaarka/derbiga iyo dhulka/shamiitada, sidaa daraateed waxaad weydiisan kartaa SATO iney kaa bixiyaan kharashka rinjiga si aad u dayactiro guriga aad kirada ugu jirto.*

*'Haddii aad rabto inaad dayactir buuxa ku sameysato hoygaaga kuu kireysan, waxaad ogollaansho weydiisataa maddaxa adeega shirkada guriga.*

## HADDII AAD KA FIKIRAYSO INAAD ADIGU DIB U NASHQADAYN SAMAYSO, XASUUSNAW IN

- waa inaad ogollaansha kusoo weydiisataa hab qoraal ah adigoo foomka kasoo daabacanaya ciiwaanka sato.fi/omatoimiremontti
- cusboonaysiinta kharashka adigu aad isku qabto
- adigu aad go'aanka leedahay, alaabta aad jeclaan lahayd inaad ku isticmaasho dib u nashqadaynta
- waad kasoo dalban kartaa kharashka rinjiga
- markii aad sameyneyso dayactirka waa inaad u hoggaansanaataa niddaamka isticmaalka alaabta iyo awaamiirta shaqo ee SATO, taasoo maddaxa adeega shirkada SATO uu kugu farey ogollaansha dayactirka
- haddii dib u nashqadayntaadu ay ku keento dhaawac abaarmenka sababtuna ay tahay adiga oon ku dhaqmin tilmaamaha shaqada, waxa kugu waajib ah inaad magdhawdo dhaawaca
- waxaad oggolaatay inaanad lacag soo dallicin dib u nashqadaynta marka aad ka baxayso abaarmenka
- cusboonaysiinta adigu samaysiga ah looguma talogalay inuu beddelo cusboonaysiinta abaarmenka ee SATO, kuwaasi oo lagu sameeyo guryaha marka alaabta oogada gurigu ay taagan yihiin xilligii ay duugoobi lahaayeen
- haddii gurigaagu leeyahay qolal uga baahan cusboonaysiin SATO, fadlan la xidhiidh maareeyaha guriga oo kala xaajoo xaaladda.

## MAALAUSSETTI / Ogollaansha soo qaadashada rinjiga

SATO waxay siineysaa cidii si iskood ah rabta iney u dayactir-to ogollaansho ay, ku soo qaataan rinjiga.

Waad soo codsan kartaa ogollaansha aad kusoo qaadan laheyd rinjiga adigoo codsigaaga kusoo diraya **OmaSATO**. codsigaaga kusoo sheeg nooca rinjiga aad rabto iyo K-Rau-tada aad rabi laheyd inaad kasoo qaadato. SATO iyada ayaa qiimeyneysa caddada rinjiga iyadoo ku saleyneysa cabirka guriga aad degan tahay. Haddii aad rabto meel yar inaad rinjiyeyso, tusaale hal qol, xasuuso inaad kusoo qorto codsiga ogollaansha rinjiga lagu soo qaadanayo. Waxaad sharaxista/ qurxinta ka eegi kartaa ciiwaanka **sato.fi/omatoimiremontti**.

Labo maalmood gudahooda ayey go'aanka kaaga soo gaa-rayaan u adeegayaasha macmaamiisha, kaagana dalbayaan rinjigii K-Rautada aad doortey. Xasuuso rinjiga waxaad u doonan kartaa markaad ogollaanshaha hesho kadib.

> Ogollaansha wuxuu ka kooban yahay: tusmada rinjiga, waraaqda wax lagu xoqo, mida wax lagu simo, koofida rinjiga, mida rinjiga lagu dhaqo sharootada, burushka wax lagu rinjiyeeyo iyo ushiisa, sime, burushka yar.
>
> Cadadda aad rabto ayaa laguu siinayaa ogollaansha aad kusoo qaadaneyso Tikkurila"Nova 7" -rinjiga hoose, markaad rinjiyeyneyso darbigaaga rinjiga sharaxaada ka eego bogga SATO.

Ogollaansha aad wax kusoo qaadaneyso waxaa la ogol yahay oo keliya rinjiga aad derbiyada u isticmaaleyso. Qalab-ka ay shirkadu gaarka u leedahay rinjiyeynteeda waxaad u baahan tahay ogollaansho gaaraa. Rinjiyeynta kadibna waa in la xaqiijiyaa bareesyada korontada.

## DAYACTIR WAX KABADAL AAD ISKAA U SAMEYNEYSO

Waa inaad u heystaa fookma ogollaansho inta aadan day-actirka bilaabin, kaasood kasoo daabacan kartid ciwaanka **sato.fi/omatoimiremontti**. Foomka kusoo qeex dhammaan shaqada, taasood rabto inaad ka qabato hoygaaga waxaa-na kusoo dirtaa foomka ciiwaanka **asiakaspalvelu@sato.fi**.

Maddaxa adeega dhismaha aad ku nooshahay ayaa go'aan ka soo gaaraya codsigaaga, kadibna go'aanka ku siinaya muddo labo isbuuc guddahood. Hirgelinta dayactirku waxay ku xiran tahay hadba siduu yahay. Xasuuo inaadan shaqada bilaabin inta laga aqbalayo codsigaaga.

## KU WARGELI JAARKA CUSBOONAYSIINTA

Cusboonaysiintu waa inayna u keenin dhaawac degganayaas-ha kale ee dhismaha.

Xasuusnaw inaad ogaysiiso cusboonaysiinta boodhka farriinta gurigaaga kahor maalin bilaabista shaqada. Waxaad dooran kartaa inaad adigu gabi ahaan qorto ogaysiiska ama inaad isticmaasho tambaleytka oo laga heli karo **sato.fi/omatoimi-remontti**.

Ogaysiiska waa inuu ku qoran yahay macluumaad kusaabsan

- abaarmenka cusboonaysiinta lagu samaynayo
- macluumaadka la xidhiidhka ee qofka samaynaya cusboonaysiinta
- in shaqadu ay si aad u saamayn karto abaarmenada kale, tus. Buuq.

Dhig ogaysiiska dhammaan jaranjarooyinka dhismaha.

## IL GOONI AH KU EEG ILAALINTA, SOOCISTA KHASHINKA IYO TAYADA ALAABTA CUSBOONAYSIINTA

Ilaali dhammaan oogooyinka gurigaaga iyo waxyaalaha dhis-muhu ka kooban yahay kuwaasi oo ay suurogal tahay inay dhaawacmaan si aanay markaa u baabi'in ama u dhaawacmin inta cusboonaysiintu socoto. Ilaalinta waa in loo sameeyo si taxadar leh, taasi oo ah in dhashka dhismuhu aanu ku faafin meel ka baxsan meesha shaqadu ka socoto si kasta oo ay xaaladdu tahay.

Ku qub khashinka ay keentay shaqada dayactirku meelaha la buuxinayo ama xarunta khashinak lagu ururiyo adiga oo si adag u raacaya shuruucda ka yaal. Ku qub khashinka ranji-ga ee dareeraha ah barta khashin ururinta dhibta dibna u isticmaal daasadaha madhan ama qallalan ama ku qub dhul khashin-qub. Wax khashinka cusboonaysiitna lama oggola inuu ku jiro weelka qashinka abaarmanka.

Isticmaal kaliya alaabta ku habboon cusboonaysiinta gudaha guriga. Waad ku beddeli kartaa alaabta aan ku talinay tilmaa-mahayaga shaqada laab la mid ah nooc iyo tayada.

## XASUUSNAW INAAD KA MASUUL TAHAY CUSBOONAYSIINTA AAD SAMAYSAY

Degganaha samaynaya cusboonaysiinta adigu-qabso wuxuu oggolaaday inuu ku dhaqmo tilmaamaha shaqada ee soosaaraha alaabta iyo SATO. Degganuhu sidoo kale wuxuu oggolaatay inaanu soo dallicin cusboonaysiinta adigu samay-siga ah ee abaarmenka marka uu ka baxayo abaarmenka.

Haddii shaqada aan la qaban iyada oo la raacayo tilmaama-ha, degganuhu wuxuu oggolaatay inuu bixinayo kharashka ay keentay raadadka dayactirka, duminta iyo dib u nidaamin-ta suurogal ah ee shaqada qaladka ah.

## MA HAYSAA SU'AALO DHEERAAD AH?

Kormeerahaagu wuxuu ku faraxsanaan doonaa inuu ka jawaa-bo su'aalaha guud ee kusaabsan cusboonaysiinta adigu-qab-siga ah. Tafaasiisha la xidhiidhka kormeeraha waxa laga heli karaa adiga oo galinaya cinwaanka jidkaaga qaybta cinwaan-ka ee **sato.fi/omakoti**.

Internetku wuxuu taagan yahay qarka marka la eego tilmaa-maha cusboonaysiinta ee dhabta ah. Hase yeeshee, raac tilmaamaha shaqada ee soosaarayaasha alaabta, iyo SATO, markaa natiijada u dambaysaa waa tayo sare iyo suurogalni-mada inay waxa xumaadaa yaraadaan.

Tusmada rinjiyeynta waxaad ka heleysaa bogga Tikkuri-la, **www.tikkurila.fi/kotimaalarit**. sidoo kale macluumaad dheeriya waad weydiin kartaa qadka Tikkurilan maalilinjalta, teleefon. 020 191 2002, maalmaha shaqada 8-19. wacyigelin dheeriya oo qurxinta waxaad ka heleysaa ciiwaanka **sato.fi/ kotona.**

*Cusboonaysiin wanaagsan!*

sato